



Farriintani waxaa iyada oo ah English, Русский, Soomaali, Español, 简体中文, TiếngViệt la soo geliyay <https://go.usa.gov/xtBQC>.

Juun 27, 2022

Ku socota: Daryeel Bixiyayaasha iyo Hay'adaha Maamulka Kiiska (CME-yada)

Ka socota: Lilia Teninty, Agaasimaha, Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Ujeedada: Jihaynta Hay'ada Medicaid ee Cusub

Qaybta Rusqad bixinta ODDS iyo aniguba waan maqalnay jawaab celintiinii iyo codsiyadiinii loogu talagalay tababarka cusub ee hay'adaha Medicaid. Qaybta Ruqsad bixintu waxay u shaqeynaysay si adag waxayna ku faraxsan tahay in ay ku dhawaaqdo koorso cusub, "Medicaid Agency Orientation."

Laga bilaabo Luulyo 1, 2022 dhammaan hoggaanka sare ee cusub ee muhiimka ah ee hay'adaha Medicaid waxaa looga baahan doonaa in ay dhammeystaan jihataynta cusub oo ay ODDS oggolaatay. Dhammaan hay'adaha codsanaya in ay noqdaan hay'ada Medicaid muddo ku beegan ama ka dambeysa Luulyo 1 waxaa sidoo kale looga baahnaan doonaa in ay dhammeystaan jihataynta.

Kuwa dhammeystay koorsoadii tijaabada ahayd ayaa si aad u wanaagsan jawaab uga bixiyay. Iyada oo laga jawaabay hadalkii xiritaanka ee wax soo jeediyaha "Jihataynta taxanaha ah waxay rabtaa in ay daryeel bixiyayaasha u diyaariso in ay guuleystaan." Kim Clement oo ah hay'ad daryeelka bixisa ee Kangaroo Care, ayaa ku jawaabay, "Taasi runtii waxay soo baxday intii lagu jiray tani. Waxaan isku diyaariyay guul ka dib qaadashadii tani [orientation], oo si aad ah uga badan marka loo eego markii aan bilaabay."

Koorsadu waa isku darka toddoba kulan oo toos ah iyo koorsooyinka Workday oo ah kuwo qofka waqtigiisa ku xiran 'self-paced' iyo kuwo la

dalbado. Ka qayb qaatayaashu [waxay isku diiwaangelin karaan koontada barashada ganacsiga la fidiyay ee Workday iyada oo la raacayo tilmaamahan soo socda](#) oo isticmaal [taageeradani si aad u qorsheysato Workday Learning](#).

Fadlan, fiiri farriinta wax gudbinaysa ee Juun 30 taasi oo bixin doonta macluumaad dheeraad ah oo qoto dheer oo ku saabsan koorsada. Fadlan su'aalahaaga ku soo hagaaji dd.licensing@state.or.us

Si Daacadnimo leh,



Lilia Teninty
Agaasimaha
Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka

Farriintii Agaasimihii hore ee ODDS ayaa laga heli karaa
<http://www.oregon.gov/DHS/SENIORS-DISABILITIES/DD/Pages/messages.aspx>

Nagala soco Facebook @oregonDHS.IDD ama twitter @OregonODDS oo wax ka ogow website-keena.

Waxaad heli kartaa dokumentigan oo ku qoran luqaddo kale, far waaweyn, farta dadka indhaha aan qabin wax ku akhriyaan ee braille ama qaabka aad doorbidayso. Xafiiska Adeegyada Naafanimada Koriinka ee Oregon kala xiriir 503-945-5811. Waan aqbalnaa wicitaanada nooc kasta leh ee adeegyada gudbinta farriimaha ee loogu talagalay Dadka dhagaha la, dhagaha la'-indhaha la', maqalku ku adag yahay ama qaba naafanimada dhanka hadalka. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan bixiyayaasha adeegyada gudbinta farriimaha booqo www.oregonrelay.com ama www.fcc.gov/encyclopedia/trs-providers.